

**Magaca musharaxa:** Alexis Mercedes Rinck

**Magaca Ololaha:** Alexis for Seattle

Boga-khadka Ola'laha: **alexforseattle.org**

**Booska magaalada:** 8

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-705-9305

Anigoo khibrad u leh taageeridda adeegyada aadanaha iyo siyaasadaha caafimaadka dadweynaha, hagidda qorshooyinka jawaab celinta guri la'aanta degdegga ah, iyo qaabeynta siyaasadda maaliyadda iyo miisaaniyadda Jaamacadda Washington, waxaan u keeni doonaa khibradda loo baahan yahay Golaha Magaalada si aan u ballaariyo guryaha la awoodi karo ee ay tahay inaan helno, bulshooyinka badbaadada leh ee aan xaqqa u leenahay, tillaabo lagu caawinayo dadka dhibaataysan, iyo maalgashiga bulshada ee hagaajinaya sinnaanta iyo fursadaha.

Ballanqaadkayga adeeggu wuxuu ku salaysan yahay waayo-aragnimada shakhsi ahaaneed ee ay wadaagaan dad badan oo reer Seattle ah maanta. Waxaan i dhalay waalidiin da'yar oo harjadayay, waxaana i koriyay awoowe iyo ayeeyo. Qoyskaygu waxa ay la tacaaleen wareegyada naxdinta leh ee xabsiga, isticmaalka mukhaadaraadka, iyo guri la'aanta. Aad ayaan ugu mahadcelinayaa in aan taageero ka helay bulshadeyda taas oo i siisay dariiqa guusha - waxaanan rabaa in aan hubiyo in dhammaan dhalinyarada Seattle ay helaan fursadahaas oo kale.

Waxaan diyaar u ahay inaan keeno aragtidayda xog ogaalka ah iyo rabitaanka natiijooyinka Golaha Magaalada oo aan cod u noqdo dhammaan dadka Seattle. Waxaan wajahaynaa caqabado degdeg ah oo u baahan fikrado cusub, tamar, iyo hoggaan. Foojarradaada iyo codadkaaga waxaan ku dhisi doonaa diiwaankayga u doodista iyo ficilka Seattle oo la awoodi karo, soo dhaweyn leh, oo hogaaminaysa dariiqa mustaqbal wanaagsan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca Musharraxa:** Saunatina Annaca Sanchez

**Magaca Ololaha:** Saunatina ee Seattle

**Website-ka ololaha:** info@saunatinaforseattle.com

**Jagada Magaalada:** 8

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 803-272-8628

Waxaa igu koriyay Holly Park iyo Yesler Terrace aabahay oo xoog u shaqeyn jiray, hooyaday naafo ah, iyo bulsho deris ah markasna waxan gacan ka geystay korinta walaalahay iga yaryar. Jacaylka aan u qabo kaabayaasha iyo qorsheynta magaalada waxaa keenay waayo-aragnimada ku noolaanshaha guryaha dadweynaha iyo isticmaalka King County Metro.

Waxaa i taageeray Transit Riders Union, halkaas oo aan ka wada aasaasey Kooxda Shaqada ee Adeegyada Baska iyo Gaadiidka. Waxaan la kaashaday kooxo kala duwan si aan u ballaariyo kaabayaasha baaskiilka iyo gaadiidka oo ay weheliyaan Naadiga Baaskiilka Cascade, oo u dooday Xafiiska Heerarka Kiraystaha iyada oo loo sii marayo Golaha Abaabulka Kiraystaha Seattle, oo aan u istaagay dimuqraadiyadda guddiga Ururka Haweenka Cod-bixiyayaasha–SKC.

Markaan tixgelinayo sharci-dejinta, waxaan weydiiyaa: "Waa maxay hadafku? Yaa ka faa'iida? Yaa lagu waxyeelayaa?

Waxaan taageeraa I-137, cusboonaysiinta sharciyada sooneynta si loo abuuro guryo badan oo qoysaska, iyo la-hawlgalayaasha bixiyayaasha guryeynta si loo sameeyo heshiisyo-xaqa-hoyga.

Waxaan wajihi doonnaa $200 milyan oo dhimista miisaaniyada ah annagoo aan u hurayn daryeelka reer Seattle iyada oo loo marayo ilo dakhli oo horumarsan sida Jumpstart iyo samaynta dakhli cusub sida cashuurta Capital Gains.

Waxaan diiradda saari doonaa adeegyada dadweynaha, 24/7/365 sida musqulaha ku yaala beeraha raaxada, si qof walba uu si badbaado leh u helo dhaqanka magaalada.

Golaha Magaalada, waxaan keeni doonaa wada shaqayn, fikir tafatiran oo ku jihaysan isku-xiridda waaxyaha iyo in la abuuro Seattle loo siman yahay dhaman.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca Musharaxa:** Tanya Woo

**Magaca Ololaha:** Saaxiibada Tanya Woo

**Webseedka Ol-olaha:** tanyawooforseattle.com

**Aagga Magaalada:** 8

**Lambarka Taleefoonka Ol-olaha:** 206-657-6679

Seetihiin! Waxaan ahayn Tanya Woo, waxaana aad ugu faraxsanahay inaan noqdo xubin loo doortay Gollaha Magaalada Seattle.

Seattle waa meel aad muddo badan ku noolaa. Qoyskaygu waxay halkaan yimaadeen sanadkii 1887, waxaana ku koray Buurta Beacon (Beacon Hill). Maanta, waxaan deganahay Xeebta Rainier (Rainier Beach), waxaana si qoto dheer u dhexgalay bulshada Degmada Chinatown/International. Qayb walba oo aan ka shaqeeyay guud ahaan Seattle, xiisaha aan shaqada u qabo marna isma badelin: waxaana kor u qaadaa codka dadka nugul.

Nasiib xumo, intii muddo ah, hogaanka Seattle waxay dayaceen baahiyaha dadka aadka u nugul. Denbiyadu waxay si aan qiyaas lahayn u saameeyaan aagageena dakhliga ugu hooseeya, iyo faafitaanka daroogada fentanyl ee aan la xakameyn ayaa galaafatay nolosha dadka deriskeena ah ee aan guryaha lahayn. Xubin kamid ah Gollahaaga ka ahaan, Waxaan mudnaanta koowaad iin doonaa maalgelinta xalalka la xaqiijiyay waxaana hubin doonaa in jawaab bixiyaasheena gargaarka, oo ay ku jiraan kooxaha caafimaadka iyo sharci fulinta, ayna helaan adeegyo buuxa.

Dhibaatooyinka aadka u daran waxaay u baahan yihiin xalal joogto ah. Laga soo bilaabo saraakiisha roondooyinka Bulshada qaabilsan ilaa abaabulka ka dhanka ah takoorka ku saleysan jinsiyada, dhisida guryaha shaqaalaha, iyo xitaa wax ka qabashada Narcan ka laga helo wadooyinka, waxaan qaaday tallaabooyin toos ah. Waxaad u qalantaa hogaamiye dadaal badan, himilo leh, ka dhameeya ballamaha oo fahansan bulshadeena ugu nugul. Maalin walba, waxaan awooda saaraa inaan xalalka diyaarka ah keeno Gollaha Magaalada aana kasoo baxo ballanta aan u qaaday deegaan doorashadeena.

Waxaan ahayn Tanya Woo, waxaana si xushmad leh u codsanayaa codkiina - iyo foojaradiina.

*Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).*



**Magaca Musharaxa:** Tariq Yuusuf

**Magaca Ololaha:** Tariq u dooro golaha deeganka

Boga-khadka Ola'laha: **tariqforcouncil.org**

**Booska magaalada:** 8

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-395-9356

Sheekadeydu waa sheeko Seattle ah. Waxaa i dhalay aabe Indonesian ah iyo hooyo Mareykan ah; Waxaan arkay isbadalka iyo kobaca gobolka labaatankii sano ee lasoo dhaafay. Waalidkeygu waxay si weyn ugu tiirsanaayeen gobolka iyo barnaamijyada bulshada ee muhiimka ah sida Maamulka Guryeynta Seattle. Waxay naga caawiyeen inaan ka hortagno hoy la'aanta oo aan dhisno nolol guul leh. Waxaan awooday inaan waxbarashadeyda ku dhammeeyo Jaamacadda Washington, tasoo ii horseeday takhasus guul leh oo ah Sancada tiknoolajiyadda, oo aan bilaabo qoyskeyga gaarkaa. In kasta oo ay halgan ku jireen, waalidkey waxay igu barbaariyeen qiyamka dareen-wadaagga, naxariista, iyo caddaaladda; qiyamka aan rajeynaayo inaan keeno golaha magaalada.

Riyadayda Mareykanka waxay ahayd suurtogal; laakiin safarkaas ayaa ku sii adkaanaya qoysaska maanta. Adeegyada bulshada ee sheekadayda ka dhigay mid la gaari karo hadda lama heli karo. Waxaan rabaa inaan beddelo taas.

Dawladda magaaladu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa nolosheena; xubin golaha magaalada ahaan, waxaan qorsheynayaa inaan u doodo dadka sida waalidkay oo kale, kuwaas oo hal jeeg laantiis u jiray guri la'aan. Waxaan qorsheynaya in aan u tabarruco magaaladaan anigoo si hagar laan ah ugu ololaynaya sinnaanta, cadaaladda, iyo isu naxariisashada, anoo caawinaya dadka ugu nugul bulshada, waxaana iga go'an inaan caawiyo qof walba si aan u dhisno bulsho midaysan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*